

**Barnaamijka Udiyargaroowga  
Caafimaadka ee Kalkalisada  
Dugsiga Hoose**

## Baadhitaanka aragtida Macluumaa loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha

Barnaamijka Udiyargaroowga Caafimaadka ee Kalkalisada Dugsiga Hoose (PSNHRP) waa hindise bilaash ah oo dowlada Queensland ay ku bixineyobaaritaano indhaha ah looguna talagalay carruurta yar yar ee loo diyaarinayo iskuulka.

PSNHRP wuxuu leeyahay koox kalkaliyeaal caafimaad oo diiwaangashan isla markaasna tababar sare leh kuna baahsan guud ahaan Queensland oona tagi doonaa dugsiga ilmahaaga inta ay kujiraan u diyaargaroowga iskuulka si loo sameeyo baaritaanka indhaha.

Baadhitaanka aragtida wuxuu hubiyaa xaaladaha guud ee isha ee saamayn ku yeelan kara awoodda aragtida ilmahaaga isla markaasna saameyn ku yeelan kara waxbarashadooda iyo koriimaddooda.

### Maxaan yeelnaa?

- Barnaamijkan waxaa lagu baaraya aragtida ilmahaaga iyadoo la adeegsanayo labo aaladaha baaritaanka aan jirka la dhix galineyn.
- Baaritaanku wuxuu qaadanayaa wax ka yar shan daqiiqo taariikhda / iskuulkaagu ogolaaday, iyadoo waxbarashada ilmahaaga wax badan carqaladeyn doonin.
- Baaritaanka kahor, kalkalisada diiwaangashan ayaa kala hadli doonta fasalka ilmahaaga howsha ku saabsan baaritaanka indhaha isla markaasna weeydiin doonta ilmahaaga magaciisa oo buuxa, taariikhda dhalashada iyo waalidkood ama magaca masuulka sharciga ah si loo aqoonsado.
- Waalidiintu uma baahna inay goobjoog u ahaadaan baaritaanka laakiin haddii aad jeelaan lahayd inaad goobjoog u ahaato, fadlan la xiriir dugsiga si taas kuugu diyaariyaan.

Somali translation: November 2021



- Haddii aragtida ilmahaaga la baaro, waxaa natijjooyinka laguugo soo diri doona qoraal. Hadii walaac dhinac aragtida ah jirto waxaa kusoo wici doona kalkalisada caafimaadka si ay kaagala hadasho gudbinta xirfadlahaa caafimaadka indhaha si qiimeyn dheeraad ah loo sameeyo.

### Maxaad u baahan tahay inaad ogaato?

- Dugsiga ilmahaaga ayaa qaybin doona xirmada ogolaanshaha baaritaanka aragtida inta lagu jiro sanadkooda iskuul isku diyaarinta. Fadlan buuxi oo ku soo celi dugsiga sida ugu dhakhsaha badan.
- Barnaamiju ma baarayo indho la'aanta ku aadan midabada oo looma maalgelin baaritaanka maqalka ilmahaaga.
- Haddii walaac dhinaca aragtida ah la aqoonsado oo uu ilmahaaga u baahan yahay ookiyaalaha indhaha, dadka xaqi u leh ee haysta kaarka daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa in lagu caawiyoo muraayadaha aasaasiga ah ee bilaashka ah iyada oo loo marayo Okiyalla Bixinta Muuqaalka (SSS) [www.health.qld.gov.au/mass/prescribe/spectacles](http://www.health.qld.gov.au/mass/prescribe/spectacles)
- Haddii aad ka welwelsan tahay indhaha ilmahaaga waqtigey ahaataba, fadlan kaxee ilmahaaga si uu u arko xirfadle caafimaadka indhaha (dhakhtarka indhaha).
- Barnaamijkan wuxuu adeegsadaa turjumaanno / fasiraad lacag la'aan ah si ay kuu caawiyaan, haddii loo baahdo.

### Nala soo xiriir

Primary School Nurse Health Readiness Program

t 1800 687 372

e Admin.PSNRP@health.qld.gov.au

w [www.childrens.health.qld.gov.au](http://www.childrens.health.qld.gov.au)



**Queensland**  
Government